



homeforward

hope. access. potential.

Su'aalaha Badanaa Lana Wediyo

Radhoon

Taariikhda:

Oktoobar 14, 2019



Jadwalka Tasmada

Jadwalka Tasmada 1

Radhoon: Su'aalo Guud 1

Waa maxay radhoon?.....	1
Halkee ayuu radhoon ka dhacaa?.....	1
Muxuu radhoon ugu noqon karaa halis caafimaadka bini'aadamka?.....	1
Ma jiraan saameyno kale ee caafimaad oo uu leeyahay radhoon?	1
Haddii aan dhuuqo tubaako, miyay tahay inaan si gaar ah isaga walaaco?	1
Miyaa dadka laga tijaabin ama baari karaa u baylah ahaanshaha radhoon?	2
Waa maxay heerka ammaan ee radhoon?.....	2
Kawaran haddii aan ka welwelsanahay caafimaadkayga ama caafimaadka qoyskayga?	2

Radhoon: Maxay Home Forward sameynayaan si wax looga qabto? 3

Miyay Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD) ka dooneysaa Home Forward inay radhoon ka baarto guryaheeda waxna ka qabato?.....	3
Maxay Home Forward u go'aansatay inay biloowdo baaritaanka Radhoon?	3
Miyay HUD ka dooneysaa Home Forward inay haysato siyaasadda Radhoonka?	3
Miyay Home Forward leeyihiin siyaasadda Radhoonka?	3
Home Forward ma ku sameysay isbeddelaad dhow Siyaasadeeda Radhoon?.....	3
Home Forward ma ka baartay Radhoon gurigayga?	4
Goorma ayay Home Forward bogaysaa baaritaanka iyo wax ka qabashada heerarka sarreeya ee Radhoon?.....	4
Marka la sameynayo baaritaanka, miyay Home Forward ka baaraan guri kasta Radhoon?	4

Radhoon: Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi karto? 6

Haddii aan doonayo inaan baaro gurigeyga, sidee ayaan u heli karaa xirmada baaritaanka radhoon oo qaali aheyn?	6
Maxay sameyn doonaan Home Forward haddii aan baaro gurigeyga oo aan ka helo heerar sareeya ee radhoon?... ..	6
Maxaan sameyn karaa si aan u wanaajiyo tayada hawada gudaha gurigeyga?.....	6

Radhoon: Su'aalo Guud

Waa maxay radhoon?

Radhoon waa gaas kaah ah oo laga helo ciida iyo dhagaxa kaasoo aadan arki, urin ama dhadhamin karin.

Halkee ayuu radhoon ka dhacaa?

Sida laga soo xigtay [Mac'hadka Kansarka ee Qaranka](#):

Radhoon waxaa laga helaa ku dhawaad hawada oo dhan. Qof kasta wuxuu neefsadaa radhoon maalin kasta, inta badan heerar aad u hooseeyo. Si kastaba ha ahaatee, dadka neefqaato heerarka sarreeya ee radhoon waxay halis dheeraad ah ugu jiraan inuu ku dhaco kansarka sambabka. Radhoon wuxuu ka galaa guryaha dillacyada sagxadaha, salka, wuxuuna ku uruura gudaha. Waxaa sidoo kale siideyn kara agabyada dhismaha, ama biyaha laga keeno ceelasha uu ku jiro radhoon. Heerarka radhoon wuxuu ku sarreyn karaa guryaha aadka loo dahaaray, si adag loo xiray, iyo/ama laga dhisay ciid ay ka buuxdo walxaha yuraniyamka, thoriyamka, iyo radiyamka. Guryaha dhulka ka hooseeya iyo dabaqyada koowaad ayaa sida caadiga ah waxay leeyihiin heerarka radhoon ee ugu sarreeya iyadoo ugu wacantahay u dhowaanshahooda dhulka.

Muxuu radhoon ugu noqon karaa halis caafimaadka bini'aadamka?

Sida laga soo xigtay [Ururka Kansarka ee Mareykanka](#):

In baylah loo noqdo radhoon waqti dheer ayaa horseedi karta kansarka sambabka. Gaaska radhoon ee ku jira hawada wuxuu u kala baxaa walxo yaryar oo kaah ah (faraca radhoonka) kuwaasoo geli kara dahaarka sambabka, halkaasoo ay ku sii deyn karaan shucaac/kaah. Shucaaca wuxuu waxyeelleyn karaa unugyada sambabka wuxuuna isla mar ahaantaa horseedaa kansarka sambabka.

Ma jiraan saameyno caafimaad ee kale oo uu leeyahay radhoon?

Sida laga soo xigtay [Maamulka Caafimaadka ee Oregon](#):

Neefsasgada radhoon ma sababto astaamaha caafimaadka bini'aadamka ee muddada gaaban sida neef-qabasho, qufac, madax-xanuun, ama qandho. Ma jirto caddayn buuxda taasoo dhigaysa in carruurto ay halis weyn ugu jiraan radhoon marka la barbardhigo dadka waaweyn. Hadda, waxaa sidoo kale jirin caddeyn buuxda taasoo dhigaysa u baylaha noqoshada radhoon inay horseedayso halis kordhaysa ee ah qaadida kansarada ama cuddurada kale.

Haddii aan dhuuqo tubaako, miyay tahay inaan si gaar ah isaga walaaco?

Sida laga soo xigtay [Maamulka Caafimaadka ee Oregon](#):

Haa. Kaliya sigaar-cabbista ayaa sababta u dhimashada kansarka sambabka oo ka badan mida radhoonka. Haddii aad sigaar-cabtid oo gurigaagu leeyahay heerarka sare radhoon, halista aad ugu jirtid radhoon si gaar ah ayay u sareysaa.

Booqo [Halista La Noolaanshaha Radhoon](#), oo laga helo Hagaha Muwaadinka ee Radhoon ee EPA, si aad u ogaato isbarbardhiga halista sigaar-cabbista iyo radhoon.

Miyaa dadka laga tijaabin ama baari karaa u baylah ahaanshaha Radhoon?

Sida laga soo xigtay [Maamulka Caafimaadka ee Oregon](#):

Xilligan, Maamulka Caafimaadka ee Oregon (OHA) kama warqabo wax baaritaannada caafimaadka caadiga ah oo go'aamiya waxyeellada sambabka ee la xiriira u baylah ahaanshaha radhoon. Habka ugu wanaagsan ee lagu ogaan karo halista u baylah ahaanshaha radhoon waa in la baaraa gurigaaga.

Xarunta Xakameynta Cudurka (CDC) waxay bixisaa [macluumaadka baaritaannada tijaabada ah kuwaasoo loo diyaariyay kansarka sanbabka](#). Waxaa lagula talinayaa dadka leh taariikh sigaar-cabbis oo da'doodu u dhaxeeyso 55-80 sanno jir.

Waa maxay heerka ammaan ee radhoon?

Sida laga soo xigtay [Wakaaladda Ilaalinta Bay'adda](#):

Radhoon waxaa lagu cabbiraa hal garaam halkii litir oo hawo ah (pCi/L), cabbirka kaaha shucaaca. Gudaha Mareykanka, celceliska heerka radhoon ee gudaha guriga qiyaastii waa 1.3 pCi/L.

Celceliska heerka radhoon ee bannanka guriga qiyaastii waa 0.4 pCi/L. Madaxa Qalliinka ee Mareykanka iyo EPA waxay ku talinayaan hagaajinta guryaha leh heerarka radhoon ee gaaraya ama ka sarreeya 4 pCi/L. EPA sidoo kale waxay ku talinaysaa in dadka ay ka fikiraan ka hagaajinta guryahooda heerarka radhoon ee u dhaxeeya 2 pCi/L iyo 4 pCi/L.

Kawaran haddii aan ka welwelsanahay caafimaadkayga ama caafimaadka qoyskayga?

Haddii aad ka welwelsantahay caafimaadkaaga, ama caafimaadka qof kamid ah qoyskaaga, fadlan la xiriir dhakhtarkaaga.

Radhoon: Maxay Home Forward sameynayaan si wax looga qabto?

Miyay Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD) ka dooneysaa Home Forward inay radhoon ka baarto guryaheeda waxna ka qabato?

Gudaha 2013 HUD ayaa soo saartay hagiis ku talinaysa baaritaanka Radhoon balse HUD ma laha wax ah shuruudo gaar ah oo loogu talagalay baaritaanka guryaha dadweynaha. Intaas waxaa dheer, HUD ma siiso Maamulka Guryeynta Dawladda (PHAs) dhigaalo dheeraad ah si loo baaro Radhoon ama wax looga qabto heerarka sarreeya haddii la ogaado.

Maxay Home Forward u go'aansatay inay bilawdo baaritaanka Radhoon?

Home Forward waxay ka bilawday baaritaanka radhoon dhismeyaasha guryaha dadweynaha ee loo diyaariyay dayactirka muhiimka ah. Marka ay Home Forward ogaaty heerarka sarreeya ee Radhoon ee ku jira dhismeyaashan, waxay asal ahaan ku biiriyeen wax ka qabashada Radhoonka ku jira guud ahaan hanaanka dhismaha. Intii ay ka sii raadinayeen Radhoon dhismeyaasha kale, waxay hagaajiyeen hanaankooda waxayna hadda si firfircoon u baarayaan waxna uga qabanayaan sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Miyay HUD ka dooneysaa Home Forward inay haysato siyaasadda Radhoonka?

Maya, Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka (HUD) kama dooneyso Home Forward inay haysato Siyaasadda Radhoonka.

Miyay Home Forward leeyihiin siyaasadda Radhoonka?

Haa. Waxaad ka soo dejisan kartaa nuqulka Siyaasadda Radhoonka ee Home Forward (<http://www.homeforward.org/RadonInfo>).

Home Forward ma ku sameysay isbeddelaad dhow Siyaasadeeda Radhoon?

Haa - iyadoo jawaab u ah jawaab-celinta qaar ka mid ah Degganeyaasha guryaha Home Forward, Home Forward ayaa dhawaan ku sameysay waxoogaa isbeddelo ah Siyaasadeeda Radhoonka. Hadaan, Home Forward waxay ogeysiin jirtay degganeyaasha natiijooyinka baaritaanka Radhoon isla wakhtiga degganeyaasha la ogeysiinayo inay heerarka Radhoon sarreeyaan iyo in kale oo waxaana la diyaarin jiray adeegyada xirfadaha ee wax looga qabanayo heerarka sarreeya.

Degganeyaasha qaarkood ayaa muujiyay inay doorbidayaan inay ka ogaadaan natiijooyinka baaritaanka Home Forward sida ugu dhakhsaha badan oo ugu macquulsan, halkii ay ka ogaan lahaayeen markii adeegyada wax looga qabanayo heerarka sarreeya la diyaarinayo, si ay u qaadaan talaabooyin ay wax uga qabanayaan heerarka sarreeya ee guryahooda intii laga gaarayo waqtiga adeegyada wax ka qabashada.

Wixii hadda ka dambeeyo, Home Forward ayaa natiijooyinka baaritaanka ku ogeysiin doonta degganeyaasha gudaha 30 maalmaha shaqada ah laga bilaabo xiliga helitaanka waxaana la jiri doona macluumaad ku saabsan tallaabooyinka degganeyaasha ay qaadi karaan si ay u wanaajiyaan tayada hawada guryahooda inta adeegyadu wax looga qabanayo heerarkan la diyaariyo.

Home Forward ma ka baartay Radhoon gurigayga?

Home Forward waxay ku jirtaa geedi-socodka baarista iyo wax ka qabashada heerar kasta ee sarreeya ee radhoon ee dhammaan guryaheeda dawladda waxayna haysaa qorshe lagu baarayo waxna looga qabanayo heerarka sarreeya ee Radhoon ee dhammaan dhismeyaasheeda guriyeynta la awoodi karo.

Haddii aad daneeynayso macluumaad ku saabsan guryo gaar ah, fadlan u booqo bogga Macluumaadka Home Forward ee Radhoon wixii ah liistada buuxda ee guyaha iyo shaqada la dhameystiray ee guryahan ilaa maanta (<http://www.homeforward.org/RadonInfo>)).

Goorma ayay Home Forward bogaysaa baaritaanka iyo wax ka qabashada heerarka sarreeya ee Radhoon?

Home Forward ayaa dhameystiri doonaan baaritaanka, iyo wax ka qabashada heerarka sarreeya marka ay macquul tahay, ee dhammaan guryahooda kamadambeysta taariilkaha soo socda:

- Guryeynta Dawladda: Disembar 30, 2020
- Guryaha La Awoodi Karo/Candhuur Dhaafka Guryaha: Disembar 30, 2023

Haddii aad daneeynayso macluumaad ku saabsan guryo gaar ah, fadlan u booqo bogga Macluumaadka Home Forward ee Radhoon wixii ah liistada buuxda ee guyaha iyo shaqada la dhameystiray ee guryahan ilaa maanta (<http://www.homeforward.org/RadonInfo>)).

Marka la sameynayo baaritaanka, miyay Home Forward ka baaraan guri kasta Radhoon?

Marka la baarayo Radhoon, Home Forward waxay qandaraas siiyaan xirfadleyaal la xaqiijiyay kuwaasoo raaco habdhaqanada qaranka ee ugu fiican ee lagu baaro waxna looga qabto heerarka sarreeya ee Radhoon ee dhismooyinka qoysaska wada deggan yihiin. Heerarkan waxaa dejiya Ururka Saynisyahanada iyo Tiknoolajiyad-yaqaanada Radhoonka ee Mareykanka, Habraaca Qabashada Cabbirka Baddeecooyinka Radon iyo Caaryada Radhoonka ee dhismeyaasha qoyska wada deggan yihiin (ANSI-AARST MAMF). Home Forward waxay raacaan heerarkan sarre.

Heerarkan waxay ka doonayaan xirfadleyaasha inay ka baaraan guri kasta dabaqa hoose, iyo inay baaraan muunad dhan boqolkiiba 10 dhammaan guryaha ku yaala dabaqa sare (ugu yaraan hal qol dabaqiiba).

Radhoon: Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi karto?

Haddii aan doonayo inaan baaro gurigeeyga, sidee ayaan u heli karaa xirmada baaritaanka Radhoon oo qaali aheyn?

Sida laga soo xigtay Maamulka Caafimaadka Oregon:

Xirmooyinka waxaa looga heli karaa dukaanka biraha \$10 ilaa \$30. Hubi oo arag haddii kharashka falanqeynta uu ku jiro qiimaha xirmada baaritaanka. Xirmada baaritaanka qaarkood waxay ku dallacaan falanqeynta lacag dheeraad ah. Waxaad ka heli kartaa xirmada baaritaanka kuwan soo socda midkood:

[Ururka sambabka ee Maraykanka \(ALA\) ee Buuraha Baasifiga](#) waxay ku iibiyaan xirmada muddada gaaban (ST) \$15 iyo xirmo muddada dheer (LT) \$38.50. Waxaad ka codsan kartaa onlaynka ama telefoonka ah 503-718-6141.

[Adeegyada Barnaamijka Radon ee Qaranka ee ka jira Jaamacada Gobolka \(sosradon.org\)](#) wuxuu onlayn ku hayaa xirmada muddada gaaban oo lagu heli karo \$15 iyo xirmada muddada dheer oo lagu heli karo \$25.

Maxay sameyn doonaan Home Forward haddii aan baaro gurigeeyga oo aan ka helo heerar sareeya ee radhoon?

Home Forward waxay ku jirtaa geedi-socodka sida xirfada leh loogu baarayo oo wax looga qabanayo heerarka sarreeya ee Radhoon halka lagu ogaado inay kaga jiraan dhisme kasta aan leenahay. Waxaan rajeynaynaa in laga qabto shaqadan guryaha dawladda oo dhan kamadambeysta dhamaadka 2020 iyo guryaha la awoodi karo oo dhan iyo dhismooyinka canshuur dhaafka ah kamadambeysta dhamaadka 2023.

Waxa jira tiro kooban oo xirfadlayaal la xaqiijiyay ah oo yaqaano hawsha oo baara oona hagaajiya heerarka sarreeya ee Radhoon. Waxaan ka shaqeynaynaa inaan gayno guri walba sida ugu dhakhsaha badan oo ugu macquulsan.

Maxaan sameyn karaa si aan u wanaajiyo tayada hawada gudaha gurigeeyga?

Wixii warbixinno dheeraad ah oo ku saabsan wanaajinta tayada hawada gudaha gurigaaga, fadlan booqo (<http://www.homeforward.org/RadonInfo>).